Sharci Lr 2 ee 14/4/99 Nidaamka ~~Maxkamada~~ Garsoorka 14/4/1999

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

## DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA

## لولاية أرض بونت الصومال

Sanndka 1aad Garoowe 1 Sebtembar 1999 L.9

**FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA** جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee **Madaxtooyada** Dawlad Goboleedka Puntland Soomaaliya

---

**Qiimaha:** waa Sh. So_10.000 lambar walba. **Rukunka** Sannadkii waa Sh. So_170.000 dalka gudihiisa, dibeddana waa ShSo _500.000_. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowdaa 1da Janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh. So._3.000. Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la weydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

---

**TUSMADA**

Qeybta Koowaad

**SHARCI**


- Sharci Lam. 1 ee 31.03.199, ........................ "Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'addahalaxiriirsan"........................................................Bogga **2**
- Sharci Lam. 2 ee 14/4/1999 ................... "Nidaamka Garsoorka" ........... .Bogga **10**


Qeybta Labaad

**XEER**


- Xeer – Hoosaadka Golaha Wakiilada Puntland....................................Bogga **15**
- Xeer Madaxweyne Lam. 1 ee 16 Agoosto 1998 dhismaha Wasaaradaha Dowladda Puntland iyo magacaabidda Wasiirada dowladda..........................................................Bogga **24**

**DAWLAD GOBO LEDKA**
**BUNTLAN EE SOOMAALIYA**

**PUNTLAND STATE**
**OF SOMALIA**

**XAFIISKA MADAXWEYNAHA**
**OFFICE OF THE PRESIDENT**

*Tix :* .......................................... *Tariikh :* ..........................................

*Ref. :* *Date :*

**Sharci lam.2 ee 14/4/1999.**
**Kuna saabsan Nidaamka Garsoorka**

## MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,

**MARKUU ARKAY:** Axdiga Dawladda,

**ISAGOO TIXGELIYEY:** Ansixinta Golaha Wakiilada ee ku cad warqada summadeedu tahay GW/148/99 ee soo baxday 8/4/1999,

## WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qod. 1aad

Nidaamka Garsoorka Dawladda Puntland ee Sharcigaan ku lifaaqan waa la ansixiyey.

### Qod. 2aad

Saddex nuqul oo Sharcigaan ka mid ah, ee uu Madaxweynuhu saxiixay waxaa loo qaadanayaa asal (originali) waxaana lagu kala kaydinayaa: 1 (hal) Xafiiska Garyaqaanka Guud; 1 (hal) Xafiiska Xoghayaha Joogtada ee Golaha Wakiilada; kan saddexaadna Xafiiska Xoghaynta Madaxtooyada.

### Qod. 3aad

Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Dawladda, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda; Wuxuu Sharcigaan ka mid noqonayaa sharciyada Dalka; Qof kasta waxaa ku waajib ah inuu dhowro kuna dhaqmo.

Garoowe, 15/4/1999.

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOMALIA
GAROOWE
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

Mashruuc sharci L.

Nidaamka garsoorka

Qod. 1aad

Garsoorka waxaa maamulaya garsoorka caadiga ah oo kala ah.

1.Maxkamadaha darajada 1aad;

2.Maxkamadaha racfaanka;

3.Maxkamadda Saee.

Qod. 2aad

Awoodaha iyo habka maxkamadaha waxaa qeexaya xeerka habka ciqaabta iyo xeerka.

Qod.3aad

Maxkamadaha darajada 1aad,saldhigeedu waa magaala madaxda waxayna awood u leedahay dhegeysiga dacwadaha ka dhaca DEGMO KASTA Degmo Kasta waxaa la abuuri karaa maxkamad daraja 1aad ee laga dhiso degma kasta, waxaana lagu dhisi karaa dekreeto Madaxweyne.

Qod.4aad

Dhegeysiga dacwadaha waa fagaare ,haddii aan garsoorku u aqoon san qarsoodi caafimaad,anshax xumo iyo nabadgelyo dartood.

Qod.5aad

Dhammaan go'aamada maxkamadaha waa in la sababeeyo marka garsooruhu ku dhawaaqayo go'aanka ha ahaado qoraal ama af,iyadoo la xusayo sharciga iyo qodobbada lagu dhaqmay.

Qod.6aad

Dawladdu waxay xaqiijineysa difaaca saboolnimo ee dadka aan awoodda u lahayn in ay qabsadaan qareenama is daafacaankaddib markii ay codsi soo qortaan.

Qod.7aad

Codsiga difaaca saboolnimada waxaa go'aan ka gaaraya guddi ka kooban Guddoomiyaha maxkamadda racfaanka ,wakiil ka socda xafiiska xeer-ilaali iyo garsoore maxkamadda darajada 1aad.

Qod 8aad

Go'aanka guddigu waa kama dambays ,kharajka difaacana waxaa bixineysa xukuumadda.

Qod.9aad

Xarunta maxkamadda racfaanka waa magaala madaxda Gobolka ,waxayna awood u leedahay dhegeysiga racfaannada laga soo qaato maxkamadaha

darajada Kowaad - 2-

Qod.10aad

Maxkamadda racfaanku waxay dacwadaha ku dhegeysan karta meelkasta oo ka tirsan Gobolka ,waxayna ku dhegeysan kartaa dacwadaha racfaanka saddex garsoore ama hal garsoore hadba sida uu go'aamiyo guddoomiyaha maxkamadda racfaanka.

Qod.11aad

Guddoomiyaha maxkamadda racfaanka wuxuu guddoomiyaha maxkamadda sare wakiil uga yahay maamulka garsoorka ee Gobolka.

Qod. 12aad

Maxkamadda sare xarunteedu waa caasimada DAWLADDA PUNTLAND(Garooew) waxayna awood u leedahay dhegeysiga racfaannada laga soo qaato maxkamadaha racfaanka ,waxayna ka kooban tahay 5 garsoore.

Qod.13 aad

Maxkamadda Sare waxay awood u leedahay dheysiga racfaanka laga soo qaato maxkamadda darajada kowaad ee ku saabsan dacwadaha shaqada,waxay kaloo leedahay awoodda dheysigadacwadaha idaariga iyo dastuuriga.

Qod.14aad

Dacwadaha idaariga maxkamadda sare waxay ku dhegeysataa xubnaha oo idil, dacwadaha caadiga ahna waxay ku dhegeysan kartaa saddex garsoore.

Qod.15aad

Maxkamadda Sare waxay awood u leedahay dhegeysiga dacwadaha dib-u-eegidda ee ciqaabta iyo madaniga,go'aamadagarsoorka ee uu soo saaro xafiiska xeerilaaliyaha guud iyo go'aan ka gaarista iskhilaafyada maxkamadaha caadiga.

Qod.16aad

Xarunta xafiiska xeer-ilaalinta Guud waa caasimada Dawladda Puntland, wuxuuna ka kooban yahay Xeer-ilaaliyaha Guud iyo ku-xigeennadiisa,tirada ku-xigeennada waa 5 xubnood.

Qod.17aad

Meelaha uusan joogin Xeer-ilaaliyaha Guud ama ku-xigeennadiisa ,waxaa wakiil uga ah hawsha xeer-ilaalinta Saraakiisha Booliiska .

Qod.18aad

Xeer-ilaaliyaha Guud iyo ku-xigeennadiisu waxay ka tirsanyihiin garsoorka

Qod.19aad

Xeer-ilaaliyaha Guud ,ku-xigeennada iyo saraakiisha booliiska oo loo wakiisho hawlaha xeerilaalinta ,waxay oogaan eedaha ciqaabta ,waxayna ka qaybgalaan doodaha dacwadaha ciqaabta iyo madaniga oo sharcigu siinayo,

waxay ilaaliyaan danaha dadka da'a yar iyo agoonta, waxay xaq u leeyihiin in ay racfaan ka qaataan dacwadaha ciqaabta iyo madanigaee la xiriira dadka da'a yar ,agoonta iyo kuwa dhimirka dhiman.
-eer-ilaaliyaha Guud wuxuu hoggaamiyaa baaritaanka [illegible]yada booliisku soo diyaariyo iyo hey'adaha kale ee baaritaanka,wuxuu kormeeraa xabsiya ,isagoo oo xaqiijinaya habsami u hirgelintaciqaabta iyo fulintooda iyo nolosha maxaabiista.

Qod.20aad

Kaaliyeyaasha,gaarsiiyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee garsoorka waxay h os yimaadaan garsoorka waana caawiyeyaasha garsoorka waxaana xukumaya sharcigaan.

Qod.21aad

Qorista,beddelka ,dallacsiinta ,ruqsada,abaalmarinta iyo anshaxa garsooreyaasha kaaliyeyaasha iyo garsiiyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee garsoorka waxaa awood u leh Guddiga sare ee garsoorka.

Qod.22aad

Guddoomiyaha maxkamadda sare iyo Xeer-ilaaliyaha Guud waxay ku hor dhaaranayaa Madaxweynaha ,garsooreyaasha kale waxay ku hor dhaaranayaan guddoomiyaha maxkamadda sare ama xafiisyada ay ka tirsanyihiin madaxdooda.

Qod.23aad

Garsooreyaasha lama xiro,xorriyada shasiyeed lagama qaadi karo,dembi laguma oo oogi karo,haddii aan oggolaasho laga helin guddiga sare ee garsoorka, ama uusan fal dembiyeed gacanta kula jirin.

Qod.24aad

Garsooreyaashu ma qaban karaan shaqo kale oo hawshooda ka horjeedda gaar ahaan qare-nimo iyo ganacsi ma qaban karaan.

Qod.25aad

Garsooreyaashu waxay ka qaybgeli karaan dhexdhexaadin(arbitration)kaddib marka uu u oggolaado Guddoomiyaha maxkamadda Sare.

Qod.26aad

Garsooreyaasha waxaa lagu qaadanayaa shuruudaha soo socda:

B)Waa in uu haystaa shahaado jaamacadeed oo shariicada Islaamka ama qaanuunka ama waa in uu yahay nin ku xeeldheer sharciga Islaamka.

T)Waa in uu asluub iyo akhlaaq wanaagsan yahay.

J)Waa in uu yahay muwaadin Puntland.

X)Waa in uusan ka yareyn 30 sano.

Qod.27aad

GARSOOREYAASHA ,kaaliyeyaasha iyo shaqaalaha kale waxay xaq u leeyihiin fasaxyada sharciga jideynayo. ,waxaana u oggolaanaya Guddoomiyaha Maxkamadda sare iyo cidda uu wakiisho.

Qod.28aad

Nidaamka iyo awoodda maxkamadda dastuuriga waxaa qeexaya Cahdi iyo nidaamka garsoorka (D.L.N.3 ee 12.6.62).

Darajooyinka garsooreyaasha

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare A1

Xeer-ilaaliyaha Guud iyo

Ku-xigeenka Guddoomiyaha Maxkamadda

Sare A 2

Garsooreyaasha ~~iyax~~Maxkamadda Sare

iyo Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Racfaanka A 3

Garsooreyaasha maxkamadaha Racfaanka iyo

ku-xigeennada xeer-ilaaliyaha Guud A 4

Garsooreyaasha maxkamadaha darajada 1aad A5

Garsooreyaasha tijaabada ku jira A9

Kaaliyeyaasha iyo shaqaalaha kale waxaa darajooyinkaooda loo raacayaa sharciga shaqaalaha dawladda.

Qod.29aad

Wixii aan ku qorrayn sharcigaan waxaa loogu noqonayaax~~Shaki~~ cahdiga, ~~iyax~~ nidaamka garsoorka (D.L. N.3 ee 12.6.62 -~~nidaamkii garsoorka~~ xeerkoaw iyosharciga shaqaalaha dawladda)

Qod.30aad

Sharcigani wuxuu dhangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha ,waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee dawladda.